

WAXQABADKA DHANKA CIMILADA EE VERMONT

Adkaysiga



Magaalada Vermont, in la abuurto adkaysi waxay la macno tahay in awood loo yeesho in laga soo kabto lagana soo kabto iyadoo sidii hore laga xooggan yahay saameynaha waxyeellada leh ee isbedelka cimilada - sida daadadka, mawjadaha kulka, iyo cimilooyinka aan la saadaalin karin. Waxaynu isbedello ku samayn karnaa dhaqankeena, nidaamyadeena, iyo sida aynu unoolahay si aan isugu diyaarino cimilo kulul.

Faa'idooyinka dhisidda adkaysi

Xataa haddii aan sameyno wax walba aan karno si aan u yarayno isbedelka cimilada, waxa aynu wali dareemi doonaa saameynteeda xun. Intaa waxa dheer, Vermonters-ka wajahaya dhibaatooyinka badan maanta ayaa unugul saameynahan.

Waxaynu maanta hirgalin karnaa tallaabooyin aynu ka hirgalinayno guriga, bulshada, iyo dowladda oo ka caawin doonta gobolkeena inuu noqdo mid adkaysi uleh isbedelka cimilada.

Udiyaar garowga hadda dunidan isbeddelaysa waxay...


- badbaadin doontaa nafo.
- yaraynaysaa khataraha iyo waxyeellada ka iman karta masiibooyinka mustaqbalka.
- ilaalinaysaa ganacsiyada iyo shaqooyinka.
- hormarinaysaa tayada nolosha ee dadka, geedaha, iyo xoolaha.
- kaydinaysaa lacag.

Heerarka adkaysiga

Guriga



Bulshada



Gobolka



XAFIISKA WAXQABADYADA DHANKA CIMILADA EE VERMONT

La xidhiidh: anr.cao@vermont.gov

Wax badan ka ogoow: www.climatechange.vermont.gov



Sidee ayaynu isugu diyaarin karnaa oo aan u dhisi karo adkaysi lagaga hortagayo isbedelka cimilada ee Vermont?



Sanduuqa Maalgalinta U Adkaysiga Bulshadu Kaga Hortagayso Daadadka

waxay ay iibsadaan hantida khattarta ugu jirta daadka.

vem.vermont.gov/flood-resilient-communities-fund

Deeqaha Taageerada Adkaysiga Beeraleyda

waxay hormariyaan adkaysiga beeraha deegaanka ee muddada dheer.

nofavt.org/grants-funding-opportunities

Barnaamijka Kaymaynta Magalooyinka iyo Bulshada

waxay ka caawisaa magaalooyinku inay abuuraan shabakad geedo ah.

vtcommunityforestry.org

Barnaamijka Isticmaalka Hadda (Current Use Program)

waxa uu usameeyaa canshuur dhaaf milkiilaha dhulka kuwaasoo aan horumarin kaymahooda iyo dhul beereedkooda.

tax.vermont.gov/property/current-use

Barnaamijka Cimilada & Caafimaadka

wuxuu bixiyaa tilmaamo ku saabsan sidii loogu adkaysto cimilada kulul iyo walaacyada kale ee caafimaad oo la socda isbedelka cimilada.

healthvermont.gov/environment/climate-health

Agabka U Adkaysiga Cimilada ee Maraykqnka

waxa uu sharraxayaa sida loo aqoonsado loolana tacaalo khattaraha la xidhiidha cimilada.

toolkit.climate.gov

Buugga Waxqabadyada U Adkaysiga Cimilada

waxay ka caawinayaan qoysasku inay fahmaan oo ay ka hadlaan u adkaysiga cimilada.

bit.ly/climate-resilience-activity-book

Iskaan garee si aad wax uga ogaato barnaamijyadan iyo waxyaabo kale oo badan



Codkaaga ayaa muhiim ah!

Vermonters waxay durba dareemeen saameynta isbedelka cimilada iyadoo jiilaaladu gaabteen, xagaagu kululaaday, abaaro, iyo fatahaado dheceen. Qorshaha Waxqabadka Cimilada wuxuu soo jeedinayaa talooyinka hoos loogu dhigayo gaaska aqalka dhirta lagu koriyo (greenhouse gases) wuxuuna taageerayaa bulshooyinka si ay ula qabsadaan isbeddelka cimilada. Xafiiska Waxqabadka Cimiladu waxa uu rabaa in uu ogaado: waxqabadyada Gobolka ee wax lagaga qabanayo isbeddelka cimilada kuwee ayaa adiga muhiim kuu ah?

XAFIISKA WAXQABADYADA DHANKA CIMILADA EE VERMONT

La xidhiidh: anr.cao@vermont.gov

Wax badan ka ogoow: www.climatechange.vermont.gov